



Warbixinada Cusube ee COVID-19 ee Magaalada Burlington

Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada
COVID-19 ee Burlington (RRC)

Juun 2021

(Soomaali) (Somali)

Tilmaamo:

- Barnaamijyada Dhalinyerada ee Xagaaga
- Macluumaadka Tallaalka COVID-19
- Hindisaha Waxbarashada Hore – Daryeelka Carruurta ee La Awoodi Karo
- Dhacdooyinka Xagaaga ee Bilaashka ah ee Loogu Talagalay Qoysaska
- Cunnooyinka Xagaaga ee Bilaashka ah ee loogu talagalay dhalinyarada da'doodu tahay 18 iyo kuwa kayar
- VERAP – Barnaamijka Kaalmada Degdega ah ee Kirada Vermont
- Moving On, Moving Up (Barnaamijka Hore U Socodka, Kor Uqaadista) - Waa Barnaamijka Tababarka Shaqada ee uu bixiyo Kalkaaliye Caafimaad oo Shatiyeysan (LNA)
- Sahanka Taliyaha Booliska ee Burlington

Barnaamijyada Dhalinyerada ee Xagaaga



Markay ahayd Juun 2, Duqa Magaalada Miro Weinberger wuxuu ku dhawaaqay diirad saarista barnaamijyada dhalinyarada xagaaga iyo howlaha qoyska ee loogu talagalay xagaaga 2021. **Iyadoo loogu mahadinayo maalgelin ka badan \$400,000 oo ka timid Qorshaha Qaranka ee Badbaadinta Mareykanka, Magaalada Burlington waxay heshay lacag lagu wanaajinayo helitaanka barnaamijyada xagaaga ee bilaashka ah ama qiimahooda la dhimay iyo ballaarinta fursadaha barnaamijyada dhalinyarada.**

Barnaamijyada & iskaashiyada la balaariyay waxaa ka mid ah adeegyada laga helo:

- Farshaxanka Magaalada Burlington - <https://www.burlingtoncityarts.org/adult-youth-and-family-classes>
- Goobaha Biyaha, Madadaalada iyo Beeraha Raaxada ee Burlington - <https://enjoyburlington.com/youth-camps/>
- Maktabada Bilaashka ah ee Fletcher - <https://www.fletcherfree.org/>
- King Street Center
- Sara Holbrook
- Flynn Center
- Degmada Dugsiga Burlington

Inta udhaxeysa barnaamijyada kaqeyb qaadashada, waxaa jiri doona xulashooyin kaladuwan oo ay ka mid yihiin kaamyada maalin badh ama maalin buuxda ah, iyo xulashooyinka gaagaaban oo kala duwan oo maalmaha usbuuca ah. In kasta oo kaamamka kaladuwan ay yeelan doonaan ujeedooyin kala duwan diirada lagu saarayo, carruurta waxay filan karaan xulashooyinka waxqabadeed sida dalxiiska bannaanka ah, isboortiga, farshaxanka, akhriska, waxbarashada, iyo waxyaabo kaloo badan!

Su'aalaha ku saabsan waxa hadda la heli karo iyo sida loo codsado, fadlan la xirii RRC recovery@burlingtonvt.gov ama 802-755-7239. Kaalmooyinka turjubaada taleefanka ayaa la heli karaa.

Tallaalada COVID-19



Had iyo jeer waa fikrad fiican inaad adiga iyo qoyskaagaba iska ilaalisaan COVID-19! Haddii aad u baahan tahay caawimaad si aad iskaga diiwaangeliso tallaalka bilaash ah oo loogu talagalay qof kasta oo da'diisu tahay 12+ fadlan RRC ka wac taleefanka 802-755-7239, AALV 802-985-3106, ama USCRI 802-655-1963 si aad ula xiriirto rug caafimaad.

Hindisaha Waxbarashada Hore – Daryeelka Carruurta ee La Awoodi Karo



Ma ubaahantahay caawimaadda bixinta lacagaha daryeelka carruurta? Ilmahaagu waxaa laga yaabaa inuu u qalmo Barnaamijka Deeqda-waxbarasho ee Tallaabooyinka Koowaad (First Steps Scholarship Program)

Qoysaska u qalma waxay Deeqda Waxbarasho ee Tallaabooyinka Koowaad ka heli karaan Magaalada Burlington, si looga caawiyo kharashka waxbarashada ee daryeelka carruurta waqtiga buuxa ah kuwaas oo ku jira barnaamijyada aqoonta ah! Si ay u codsadaan, qoysasku waxay u baahan yihiin inay ahaadaan kuwo degan Burlington, oo waa inay buuxiyaan shuruudaha dakhliga qaarkood, oo waa inay haystaan ilmo da'diisu tahay 8 toddobaad jir illaa 2 ½ sano jir.

SIDA LOO CODSADO:

Waxaa la aqbalayaa codsiyada muddada codsiga deeqda waxbarasho ee 2020-2021. Si aad u codsato, wac ama iimayl u dir Paula Bonnie paula@letsgrowkids.org or 802-398-5464. Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Xarunta Wicitaanka ee RRC oo laga helo 802-755-7239 si aad u hesho wixii caawimaad ah. Adeegyada turjubaada taleefanka ayaa la heli karaa.

Wax dheeri ah ka ogow www.burlingtonvt.gov/it/earlylearning.

Dhacdooyinka Xagaaga ee BILAASHKA ah ee Loogu Talagalay Qoysaska



QOQB KA CAYAARKA BIYAHA (SPLASH DANCE) - Jimce walba laga bilaabo Junn 4 - Sebtember 10

Carruurta waxay xagaagan ku madadaali doonaan goobta biyaha burqa ee cusub ee Beerta Raaxada Magaalada! Biyaha burqa ee iftiinka badan, kursiga curyaamiinta lagu gali karo waxay shaac baxaysaa xagaagan iyadoo lagu sameeynayo Qoob ka Cayaarka Biyaha Burqa (Splash Dance). 15 Maalmood oo Jimco ah, DJ-yada maxalliga ah ayaa cayaarsiin doonaan heesaha u roon qoysaska iyadoo biyaha burqanayaan. Qoysasku waxay dhamaadyada usbuuc waxlab ku bilaabi doonaan qaab ka cayaar iyo DJ-yada cajiibka ah oo loo kala bedeli doono ee barnaamijkan abid-noocan ah.

TWILIGHT CONCERT SERIES (MUSALSALKA RIWAAYADA TWILIGHT) - Jimce kasta iyo Sabti kasta 7 fiidnimo, laga bilaabo Juun 18

Tani waa taxane riwaayad cusub ah oo ay soo bandhigayaan kooxaha Vermont taas oo lagu soo bandhigayo goob sharaxan oo fiidkii ah oo ku taala bartamaha magaalada.

MAALMAHA FANKA EE SABBIDA AH EE QOYSKA – Sabtida 4^{ta} ee bil kasta (dhacdada xigta waa Juun 26 11am-1pm)
Qoysaska waxaa lagu casuumayaa inay yimaadaan barxadda Burlington City Art Center si ay u abuuraan farshaxanno u gaar ah oo ay ku dheehan tahay bandhigyo farshaxan oo hadda jira. Sabti kasta Farshaxanka Qoyska ah waa bilaash waxayna bixisaa mashruuc farshaxan samayn ah oo kicin doona fikradaha ka dhex guuxaya xubnaha qoyskaaga.

Cunnooyinka Xagaaga ee Bilaashka ah ee loogu talagalay dhalinyarada da'doodu tahay 18 iyo kuwa kayar

Baahida nafaqada ee ardayda ma joogsato xitaa haddii iskuulada la xiro. Ka caawi ardayda inay ku raaxaystaan xagaaga iyagoo la siinayo cunnooyinka cusub ee maxalliga ah! Mashruuca Cuntada Dugsiga Burlington wuxuu cunnooyinka xagaaga oo bilaash ah siiyaa dhammaan carruurta iyo dhalinyarada. Looma baahna codsi ama diiwaangelin! Kaliya imaaw waqtiyada cuntada ee hoos ku taxan.

Saacadaha Xagaaga 2021 - Juun 21 ilaa Agoosto 20
Waxaa la heli karaa Isniinta ilaa Jimcaha

Abaartimentiyada Riverside

Qadada 11:00am-2:00pm (Waxaa la bixiyaa 12)

Abaartimentiyada South Meadow

Qadada 11:00am-2:00pm (Waxaa la bixiyaa 12)

Abaartimentiyada Franklin Square

Qadada 11:00am-2:00pm (Waxaa la bixiyaa 12)

Cuntooyinka fudud 5:00pm-7:00pm (Waxaa la bixiyaa 5:30)

Beerta Roosevelt

57 Oak Street, Burlington

Casho 4:00pm-6:30pm (Waxaa la bixiyaa 5)

Cusub! Beerta Raaxada ee Magaalada


Ka gadaal ee Hoolka Magaalada, 149 Church Street

Qadada 11:00am-2:00pm (Waxaa la bixiyaa 12)

Cusub! Dugsiga Hoose ee CP Smith

332 Ethan Allen Pkwy

Cuntooyinka fudud 1:00pm-4:00pm (Waxaa la bixiyaa 2)



Si aad wax uga ogaato goobaha cuntada bilaashka ah ee xagaaga kuwaas oo kuugu dhow kuna yaala Vermont, wac 2-1-1 (adeegyada tarjumaanka taleefanka ayaa la heli karaa) ama qoraalka FOOD u dir 877-877 (Ingiriis).

Barnaamijka Kaalmada Degdega ah ee Kirada Vermont

CAAWIMAAD MA UGU BAAHANTAHAY BIXINTA KIRADA?



Kaalmada kirada iyo biilasha adeegyada guryaha ayaa la heli karaa si looga caawiyo reer Vermont inay ka badbaadaan guriga ka saarista iyo inay bixiyaan biilasha adeegyada guryaha!

Barnaamijku wuxuu qoysaska ka caawiyaa bixinta **haraaga kirooyinka hadda ah iyo kuwii hore, kharashaadka tamarta guriga iyo adeegyada guriga ee hadda ah iyo kuwii hore, iyo kharashyada kale ee la xiriira guryaha.** Kaalmada adeegyada guryaha waxaa ka mid noqon kara kharashyada korantada, gaaska, biyaha, bulaacada, qaadista qashinka iyo tamarta, sida shidaalka. Codsiyada waxaa loo baahan doonaa inay soo buuxiyaan kireystaha iyo milkiilaha guriga labadaba, oo lacag bixin waxaa si toos ah loogu dirayaa milkiilaha.

Websaydh: <https://erap.vsha.org/> (Turjumaadyo ayaa la helayaa)

Wixii Caawimaad ah ee La Xiriira Codsiga iyo Taageerada Luqadda, la xiriir:

AALV - Ururka Afrikaanka ku nool Vermont

<http://www.aalv-vt.org/>
(802) 985-3106

CVOEO - Awood Siinta Dhaqaale ee Mashruuca New Americans

<https://www.cvoeo.org/>
(802) 860-1417 x117

USCRI Vermont - Guddiga Mareykanka ee Qaxootiga iyo Muhaajiriinta

<https://refugees.org/uscri-vermont/>
(802) 655-1963

Barnaamijka Horu-Socodka, Kor Uqaadista



DIYAAR MA U TAHAY ISBEDEL?

XIRFAD SHAQO OO CUSUB ka bilow qeybta daryeelka caafimaadka oo KOBAC!

MUSHAHAAR SAREEAYA shaqeyso adigoo ah Kalkaaliye Caafimaad oo Ruqsad haysta (LNA). Barnaamijkan 10-ka toddobaad ah wuxuu BILAASH u yahay codsadayaasha u qalma, kuwaas oo waliba lacag lagu siin doono tababbarkooda. Taageero waxbarasho oo dheeri ah ayaa la siin doonaa. Koorsadan waxaa lagu bixin doonaa internetka iyo qof ahaan, saddex habeen usbuucii.

Fasalada Tababarka Soosocda Waxay Bilaabmayaan:

- Luulyo 13
- Sebtember 8
- Oktoobar 26
- Diseembar 13

Si Aad U Codsato:

Booqo www.burlingtonvt.gov/covid-19/LNA

Wixii su'aalo ah, iimayl ugu dir gnanton@burlingtonvt.gov.

Sahanka Taliyaha Booliska ee Burlington



Magaalada Burlington waxay hada raadineysaa taliyaha booliska ee xiga! Magaalada ayaa rajeyneysaa inay jawaab-celin/fikrado ka soo uruuriso bulshada kuwaas oo ku saabsan tayooyinka ay jeclaan lahaayeen in ay arkaan in hogaamiyaha xiga ee waaxda booliska uu yeesho, iyo sidoo kale waxyaabaha mudnaanta leh ee ay tahay waaxda booliska inay ka shaqeeyaan mustaqbalka. Xog uruurinta waxaa loo tarjumay 8 luqadood oo kala duwan, waxaana loo bedeli karaa luqad kale iyadoo la isticmaalayo badhanka ku yaal geeska midig ee kore.

Qaado sahankan: https://www.surveymonkey.com/r/btv_police_chief_search

Su'aalo miyaad qabtaa? Caawinaad ma u baahan tahay?

Xarunta Kheyraadka iyo Soo-kabashada COVID-19 Burlington (RRC) waxay halkan u joogtaa inay ku caawiso, nagala soo xiriir 802-755-7239 ama recovery@burlingtonvt.gov oo farriin ahaan u reeb magacaaga, luqadda aad doorbidayso, iyo macluumaadka lagaala soo xiriiri karo waxaana kuu caawin doonnaa sida ugu dhakhsaha badan. Xarunteena wicitaanku waxay leedahay adeegyada tarjumaada taleefanka. Saacadaha aan shaqeeyno waa Isniinta ilaa Jimcaha, 8:00am-4:30pm.

Hel Tarjumaadaha:

Waaxda Caafimaadka Vermont

<https://www.healthvermont.gov/media/translation/covid-19-translations>

Magaalada Burlington

<https://www.burlingtonvt.gov/covid-19/translated>

Guddiga luuqadaha badan ee Vermont:

<https://www.youtube.com/channel/UC3zjPpeFnXqvESr1y3d4DvQ>

Macluumaadka ku jira dukumintigan waa la beddeli karaa hadba inta tilmaamaha laga cusbooneysiinayo ilaa heer qaran iyo heer gobol.